



Miisaaniyadda Muwaadinka 2024



**Dowlad Gobaleedka Koonfur Galbeed
ee Somalia**



**Ministry of Finance
Wasaaradda Maaliyadda KGS**

Wazaaradda Maaliyadda

Miisaaniyadda Dowlada Koonfur Galbeed ee sanadka 2024

Maamulka Koonfur Galbeed ayaa loo xilsaaray in sanad walba ay daabacdo miisaaniyadda muwaadinka si ay u xaqiijiso in ay miisaaniyadu noqoto mid ay dadweynuhu ka warqabo, Waxaana naqshadeeyay waaxda Dhaqaalaha, waxayna doonaysaa waaxdu in ay muwaadiniinta ku wargeliso waxyaabaha la xiriira ee miisaaniyadda Maamul goboleedka Koonfur Galbeed, oo ay ku jiraan Saadaalinta dakhliga iyo faahfaahinta kharashaadka ay dowladu bixin doonto. Siyaasadaha Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed waxaa hagaya Qorshaha Horumarinta Istaraatiijiga ee dowladu ay leedahay taa oo si sanadle ah loo dejiyo, ayadoo lagu saleynaayo ahdaafta Miisaaniyada si miisaaniyada maamulka ay u noqoto mid ay dadweynuhu kugula xisaabtamaan maamulka.

Waa maxay Miisaaniyadda Dowlada Goboleedka?

Miisaaniyadda Dowlad Goboleedyadu waa Dukumenti ay ka mid yihiin saadaalinta dakhliga iyo kharashaadka ku baxaya sanadka soo socda. Wuxuu ku salaysan yahay hortabinta dowladda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa qabanqaabinaysa siminaar ay la yeelanaysa kulan dhamaan Hey'adaha dowlada ay ka koobantahay, ayadoo laga wada hadlayo waxyaabaha mudnaanta u leh dowladda iyo marxaladaha maaliyadeed ee sanadka soo aaddan. Ka dib marka la qaybiyo saqafyada miisaaniyadda, wasaaradaha iyo hay'adaha kale waxay usoo gudbineyaan wasaarada Maaliyada dhamaan hindasiyaashooda. Waxaana hindisayaasha ka arinsanaya Guddiga dib u eegista Miisaaniyadda kadibna waxey u diran baarlamaanka si uu uga doodo, una ansixiyo. Intaas ka dib miisaaniyadda waxaa loo dirayaa Madaxweynaha si loo soo saaro xeer madaxweyne oo miisaaniyada lagu dhaqangeliyo, oo sidaa ay ku noqoto miisaaniyaddii ugu dambaysay ee sanadka soo socda la meel marindoono.

Maalgasashada dadka ku Nool Dowlada Koonfur Galbeed

34.3% (\$27,2 million) ee miisaaniyada soo noqnoqata iyo Miisaaniyada Xoogeeda waxey geli doonta horumarinta dhaqaalaha gobolka iyo waaxda horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha; Tani waxa loo tixgelineyaa inay tahay kaalinta labaad ee ugu weyn ee miisaaniyadda loo qoondeeyay ka dib wadarta miisaaniyada caafimaadka iyo waxbarashada.

Xoojinta Hay'addaha Dowlada

20.47% (\$16 million) oo ka mid ah miisaaniyadda guud ayaa loo qoondeeyay dowlad dhiska iyo maamulka dowlada si loo kordhiyo tayada maamulka dowliga ah iyo wax-qabadka dowlada.

Ammaanka bulshada

6.36% (\$5 milyan) oo kamid ah miisaaniyadda guud ayaa loo qoondeeyay amniga bulshada iyo dadweynaha, maadaama ay tahay mudnaan wayn oo dowladeed.

Kala saarista Shaqada Dawlada ku saleysan habka shaqada

| COFOG | Miisaaniyadda Guud |
|---|--------------------|
| Arrimaha Dhaqaalaha (Economic Affairs) | 34.28% |
| Waxbarashada (Education) | 15.20% |
| Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection) | 1.51% |
| Adeegyada Dadweynaha Guud (General Public Services) | 20.47% |
| Caafimaadka (Health) | 19.22% |
| Degenaanshaha iyo waxyaabaha lagu bulshada ay isticmaasho (Housing and community amenities) | 1.23% |
| Isku heynta Dadweynaha iyo Ammaanka (Public Order and Safety) | 6.36% |
| Fayadhowrka Bulshada (Social Protection) | 1.72% |
| Wadarta Guud | 100.00% |

DAKHLIGA

Wadarta guud ee dakhliga sanadka 2024 waxaa lagu qiyaasay **39,835,730.73**, ayadoo lagu talagaley dakhliga gudaha inuu gaari karo **\$5.9 milyan** dhammaadka 2024, taas oo koartey **54%** marka loo eego 2023/22. Sida ka muuqata shaxda hoose. Deeqaha loogu talagalay sannadka 2024 ayaa lagu qiyaasay \$ **33,934,737.73** halka qoondada saxda ah ee 2023 ay ahayd **\$15,887,950.67** taasi oo korortey qiyas dhan **53%**

| | Dakhliga 2022 ee saxda ah (Actuals) | SAADAASHA UGU DANBEYSKA AH (FINAL PROJECTIONS) 2023) | Dakhliga sida saxan loo soo aruuriyey (Final Collections 2023) | Farqigaga boqoleyda % Difference |
|--|-------------------------------------|---|---|----------------------------------|
| Dakhliga Canshuurta (Tax revenue) | 2,977,145 | 4,586,557 | 4,532,828 | -1% |
| Dakhliga aan canshuurta ahyn (Non-Tax Revenue) | 401,571 | 522,043 | 426,366 | -18% |
| Wadarta Guud (Total) | 3,378,717 | 5,108,600 | 4,959,194 | 3% |

| | | | | |
|-------------|--|------------|------------|------|
| Budget 2023 | | 46,556,383 | 32,543,586 | -30% |
|-------------|--|------------|------------|------|

Dakhliga Canshuurta ah iyo midka aan canshuurta ahyn ee maamulka kasoo xarootey sanadka 2023 wuxuu ahaa **USD 4,959,194** marka la barbar dhigo saadaashii 2023 oo ahayd **USD 5.1 million**. Cashuur uruurinta sanadka 2023 ayaa aad u fiicneyd marka loo barbardhigo sanadihii hore waxaana jirey farqi **1%**.


Saadaasha Dhaqaalaha Guud

Shaxda 1aad waxey kala saarsaareysaa Saadaasha Dhaqaalaha Guud, ayadoo hoos ka xariiqeysa qaab dhismeedka dhaqaalaha guud sanadka 2024-2025 ee wadanka, asagoo koobeya waxsoosaarka wadanka iyo wax iibsiga dadweynaha

Table 1 – National Macroeconomic Assumptions

| | 2019 | 2020 | 2021 | 2022 | 2023 | Proj 2024 | Proj 2025 | Proj 2026 |
|---|-------|-------|-------|-------|-------|-----------|-----------|-----------|
| National income and prices Nominal GDP in millions of U.S. dollars | 6,485 | 6,883 | 7,628 | 8,414 | 9,009 | 9,806 | 10,687 | 11,633 |
| Real GDP, annual percentage change | 2.7 | -0.3 | 2.9 | 1.9 | 3.1 | 3.7 | 3.9 | 4 |
| Real GDP per capita in U.S. dollars | 416 | 403 | 404 | 400 | 401 | 405 | 409 | 414 |
| CPI (period average, percent change) | 4.5 | 4.3 | 4.6 | 9 | 3.9 | 4 | 3.6 | 3.3 |
| Current account balance | -10.4 | -10.8 | -17.1 | -15.9 | -13.6 | -14.8 | -15.3 | -15.1 |

Source: IMF October 2022, Article IV report



GDP-ga dhabta ah waxaa waxyeelleeyay hoos u dhaca dhaqaale ee uu aduunka ka dhacey taa oo uu COVID-19 sababey, iyo Sicir bararka qiimaha ee ay sababeen dagaalka Ruushka iyo Ukraine, iskahorimaadyada gudaha, iyo abaarihii 2020 ilaa 2023 iyo daadadka oo sababay kala go'a wadooyinka isku xira magaalooyinka midaa oo sare u qaadey qiimaha badeecadaha lagu geeyo magaalooyinka, iyo helitaanka badeecadaha, taasi ayaa horseeday xasaradda qiimaha cuntada waxayna hoos u dhigtay kororka mar kale sanadka 2022, iyadoo kororka 1% boqolkiiba (pp) kordhay 2023. Ka-qaybgalka shaqaalaha oo hooseeya (30% dadka), Cunno yarida, barakaca gudaha, abaaraha daba dheeraaday iyo hoos u dhac ku yimid dhoofka badeecadaha ayaa waxay muujineyaan khataro hoos usii dhac socday. Sannadka 2024, koror dhexdhexaad ah oo ku saabsan kobaca dhabta ah ee GDP ayaa la filayaa iyadoo Soomaaliya ay gaadhay Deyn cafinta HIPC. Deymo badan ayaa laga yaabaa in ay kordhiyaan kalsoonida maalgashadaha. Taa waxa ay ubaahantahay qorshe xoogan oo Dakhliga gudaha lagu abaabulo oo loogu talagalay joogteynta saamiga

deynta iyo GDP ga. Xawaaladaha gaarka loo leeyahay, kuwaas oo maalgeliya ganacsiyada lacagyarida wajaha, ayaa la filayaa inay la mid ahaadaan kharashka ay bixiyaan tii sanadihii hore. Bangiga Aduunku wuxuu rajeynayaa in is-waafajinta siyaasadaha dakhliga ee u dhaxeysa Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah ay kordhin karto xasilloonida siyaasadeed isla markaana ay xoojin karto kalsoonida maalgashadayaasha.

Wadarta Guud ee Dakhliga wasaaradaha iyo Hay'adaha Kale ee Dowlada (MDA)

| Magaca Hayadda | Wadarta La Qorsheyey | % Boqolley |
|--|----------------------|------------|
| Gudiga Shaqaalaha Rayidka | \$ 54,270.00 | 0.14% |
| Maxkamadda Sare | \$ 744.00 | 0.00% |
| Wasaaradda Beeraha & Waraabka | \$ 3,508,335.99 | 8.84% |
| Wasaaradda Gargaarka & Maareynta Musiibooyinka | \$ 297,380.00 | 0.75% |
| Wasaaradda Waxbarashada | \$ 6,014,380.00 | 15.16% |
| Wasaaradda Degaanka & Duurjoogta | \$ 590,547.00 | 1.49% |
| Wasaaradda Maaliyadda | \$ 6,254,596.00 | 15.77% |
| Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda | \$ 201,913.00 | 0.51% |
| Wasaarada Caafimaadka | \$ 7,563,976.00 | 19.07% |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | \$ 21,444.00 | 0.05% |
| Wasaaradda Warfaafinta | \$ 25,056.00 | 0.06% |
| Wasaaradda Arimaha Gudaha & Dowladaha Hoose | \$ 1,456,778.97 | 3.67% |
| Wasaaradda Amniga Gudaha | \$ 1,814,600.96 | 4.57% |
| Wasaaradda Awqafta iyo Arrimaha Diinta | \$ 15,420.00 | 0.04% |
| Wasaarada Cadaaladda & Garsoorka | \$ 40,716.00 | 0.10% |

| | | |
|--|-------------------------|----------------|
| Wasaaradda Shaqaalaha & Arimaha Bulshada | \$ 277,328.00 | 0.70% |
| Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | \$ 3,440,969.58 | 8.67% |
| Wasaaradda Batroolka & Kheyraadka Dabiiciga | \$ 15,420.00 | 0.04% |
| Wasaaradda Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga | \$ 1,024,404.69 | 2.58% |
| Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta | \$ 15,420.00 | 0.04% |
| Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta | \$ 480,080.00 | 1.21% |
| Wasaaradda Dastuurka & Dib u Heshinsiinta | \$ 25,056.00 | 0.06% |
| Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda | \$ 15,420.00 | 0.04% |
| Wasaaradda Gaadiidka | \$ 282,717.00 | 0.71% |
| Wasaaradda Biyaha & Tamarta | \$ 5,771,334.11 | 14.55% |
| Wasaaradda Haweenka & Xuquuqul Insaanka | \$ 300,045.00 | 0.76% |
| Wasaaradda Dhalinyarada iyo Cayaaraha | \$ 58,065.00 | 0.15% |
| Xafiiska Hantidhowraha Guud | \$ 43,584.00 | 0.11% |
| Baarlamaanka | \$ 31,320.00 | 0.08% |
| Xafiiska Madaxweynaha | \$ 31,320.00 | 0.08% |
| Wadarta Guud | \$ 39,672,641.30 | 100.00% |

Kharashaad

Wadarta guud ee kharashka sanadka 2024 waxaa lagu qiyaasay \$ **39,835,730.73** marka loo barbar dhigo ururinta dhabta ah 2023 oo ahaa **20,726,899.84**.

Mushaaraadka shaqaalaha ayaa lagu qiyaasay **13,451,701.33 (34%)**, oo ka mid ah kharashka guud, halkaas oo sida loo saadaaliyay isticmaalka badeecadaha iyo adeegyadda **20,527,060.57(52%)** oo ah kharashkii ugu sareeyay ee la qorsheeyey sanadka 2024.

Wadarta Guud ee Kharashka wasaaradaha iyo Hay'adaha Kale ee Dowlada (MDA)

| Magaca Hayadda | Wadarta La qondeyey | % Boqolleey |
|--|---------------------|-------------|
| Xafiiska Xisaabiyaha Guud | \$ 8,900.00 | 0.01% |
| Gudiga Shaqaalaha Rayidka | \$ 93,870.00 | 0.19% |
| Maxkamadda Sare | \$ 204,000.00 | 0.26% |
| Wasaaradda Beeraha & Waraabka | \$ 3,525,735.99 | 8.87% |
| Wasaaradda Gargaarka & Maareynta Musiibooyinka | \$ 316,580.00 | 0.77% |
| Wasaaradda Waxbarashada | \$ 6,042,492.00 | 15.20% |
| Wasaaradda Degaanka & Duurjoogta | \$ 609,747.00 | 1.51% |
| Wasaaradda Maaliyadda | \$ 1,314,603.63 | 9.54% |
| Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda | \$ 220,713.00 | 0.53% |
| Wasaarada Caafimaadka | \$ 7,683,176.00 | 19.22% |
| Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha | \$ 40,744.00 | 0.08% |
| Wasaaradda Warfaafinta | \$ 167,856.00 | 0.24% |
| Wasaaradda Arimaha Gudaha & Dowladaha Hoose | \$ 1,586,032.97 | 3.83% |
| Wasaaradda Amniga Gudaha | \$ 2,976,264.33 | 6.04% |

| | | |
|--|-------------------------|----------------|
| Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimha Diinta | \$ 34,620.00 | 0.06% |
| Wasaarada Cadaaladda & Garsoorka | \$ 58,116.00 | 0.12% |
| Wasaaradda Shaqaalaha & Arimaha Bulshada | \$ 271,872.00 | 0.69% |
| Wasaaradda Xanaanada Xoolaha | \$ 3,460,169.58 | 8.70% |
| Wasaaradda Batroolka & Kheyraadka Dabiiciga | \$ 32,820.00 | 0.06% |
| Wasaaradda Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga | \$ 1,043,604.69 | 2.61% |
| Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta | \$ 34,620.00 | 0.06% |
| Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta | \$ 499,280.00 | 1.23% |
| Wasaaradda Dastuurka & Dib u Heshinsiinta | \$ 44,256.00 | 0.09% |
| Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda | \$ 32,820.00 | 0.06% |
| Wasaaradda Gaadiidka | \$ 50,280.00 | 0.42% |
| Wasaaradda Biyaha & Tamarta | \$ 5,790,534.11 | 14.57% |
| Wasaaradda Haweenka & Xuquuqul Insaanka | \$ 319,345.00 | 0.78% |
| Wasaaradda Dhalinyarada iyo Cayaaraha | \$ 77,265.00 | 0.17% |
| Xafiiska Hantidhowraha Guud | \$ 61,584.00 | 0.13% |
| Baarlamaanka | \$ 761,320.00 | 1.00% |
| Xafiiska Madaxweynaha | \$ 2,309,420.00 | 2.95% |
| Wadarta Guud | \$ 39,672,641.30 | 100.00% |